


Haringey Home Connections

Doorashada adiga ayaa iska leh



Hagitaankaaga ku
saabsan **sida**
keliya
Ee aad ugu guuri
karto guri rasmi
ah oo ay
dawladda hoose
leedahay

Haringey Home Connections – oo si wadajir ah u shaqaynaya si ay dadka xaafadda ugu soo bandhigaan doorashooyin badan oo ku saabsan doorashooyinkooda guryaha.

www.haringey.gov.uk

 **homeconnections**
letting...you choose

HARINGEY COUNCIL

Kiraynta doorashada ku salaysan

Waa maxay Home Connections?

Haringey Home Connections waa adeegga cusub ee kiraynta. Dadka ku jira diiwaankayaga guryaha iyo ka beddelku way isticmaalayaan si ay uga helaan guri ay degaan oo rasmi ah oo ay kiraystaan anaga ama ururada guryaha.

Haringey Home Connections waxay ku salaysantahay habka cusub ee kii hore ka wanaagsan ee loo kireeyo guryaha; 'kiraynta doorashada ku salaysan' (choice based letting).

Kiraynta doorashada ku salaysan, waa maxay macnaheedu?

Macnaheedu waa in maadaama aad tahay qof raadinaya meel uu ku noolaado ama bedel ah meel kale oo ku habboon adiga iyo qoyskaaga oo isla Haringey ah, aad adigu dooranayso meesha aad ku noolaanayso, oo aad ka dooranayso liistada guryaha bannaan ee dawladda hoose. Toddobaad walba guryo cusub ayaa liistada guryaha bannaan ku soo biira, sidaas darteed toddobaad walba guryo cusub ayaa la xayeesiiyaa oo la kireeyaa.

Yaa ka faa'iida?

Yaa ka faa'iida habkan cusub ee dad dega loogu raadinayo guryaha dawladda hoose iyo kuwa ururada guryaha?

Qof kasta oo ku jira diiwaanka guryaha iyo ka bedelka oo guri rasmi ah ka raadinaya xaafadda Haringey.



Kiraynta doorashada ku salaysan waxa loogu talagalay inay ku siiso fursadda ugu wanaagsan ee aad ku heli karto guri rasmi ah. Waad dooran kartaa nooca guriga aad doonayso, iyo xaafadda aad ka doonayso iyo inay u dhowdahay ama ka fogtahay goobaha adeegga sida dukaamada, dugsiyada, meelaha furan, kilinikyada, iyo basaska iyo tareenada aad doonayso. Waxa aad dooranaysaa ta adiga kuugu habboon. Waxa uu macnaheedu yahay inaan aanu kuu dooraynin ama aanaan iska malaynaynin waxa aad jeceshahay.

Laakiin marka ugu horraysa waa inaad iska diiwaangelisaa Adeegga Guryaha ee Dawladda Hoose ee Haringey. Waxaanu kaala hadli doonaa baahiyahaaga dhibcahaaga guryahana waxaanu kuugu qaybin doonaa si waafaqsan Siyaasadda Kiraynta ee Dawladda Hoose. Tirada dhibcaha ah ee aad haysataa waxay ka turjumaysaa duruufahaaga gaarka ah iyo inta aad diiwaanka ku jirtay. Haddii aad samaysay oo aad dalbatay guri ma aha inaad mar labaad isdiiwaangeliso.



Kiraynta doorashada ku salaysan

Yaa ka faa'iida?

Marka aad isu diiwaangeliso guri in lagu siiyo waxa lagu soo dirayaa aqoonsigaaga isticmaalaha (ID) iyo lambarka qarsoodiga ah (PIN) waxaana lagu sheegayaa inta dhibcood ee aad haysato. Aqoonsigaaga isticmaaluhu (ID) wuxuu noqon doonaa lambarkaaga tixraaca ee liistada sugitaanka oo uu weheliyo lambarka 0, kani wuxuu noqon doonaa lambar lix lambar ka kooban tusaale ahaan 023456.

Lambarkaaga qarsoodiga ahi wuxuu noqon doonaa taariikhdaada dhalashada oo ah lambar lix lambar ka kooban. Tusaale ahaan haddii aad dhalatay 2dii bishii September 1961kii lambarkaaga qarsoodiga ahi wuxuu noqon doonaa 020961.

Waxaanu u aragnaa in faa'iidooyinka qorshaha kiraynta doorashooyinka ku salaysani ay yihiin qaar istaahila dadaalka aad u baahantahay in aad gelisid – dadka guryaha la siiyeyna sidaas ayay sameeyaan. Iyada oo ay doorasho ku siinayso ayay weliba tahay mid ka fudud kana jaban si loo wado oo loo maamulo (si aanu markaas intii hore in ka badan ugu kharash garayno guryaha iyo adeegyada) inta jeer ee aad doonto ayaanaad u tartami kartaa iyadoon lagu ganaaxin ama dhibco lagaa goyn.

Si aad ugu guurto guri rasmi ah oo ay leedahay dawladda hoose waa inaad isticmaashaa nidaamka Home Connections.

Bariga Haringey

Tottenham waxay leedahay goobaha ciyaaraha iyo nasashada oo wanaagsan, sida Xarunta Tottenham Green Leisure Centre iyo Bruce Castle Park. Waxa kale oo ku yaalla Kilaabka Kubadda Cagta ee dunida caanka ka ah ee Spurs, waxa waxoogay ka shisheeya Lee Valley Park, meel weyn oo furan oo laga helo waxyaabo badan oo lagu madadaasho.



Sidee ayay u shaqaysaa?

- ▶ Toddobaad walba inta u dhaxaysa Arbacada iyo Isniinta xigta waxaanu xayeysiinaa guryaha bannaan ee kirada diyaarka u ah.
- ▶ Ugu dambayn habeen badhka Isniinta waxaad dooranaysaa hal guri ama in ka badan oo ah kuwa aad doonaysom markaasaad u tartamaysaa.
- ▶ Maalinta Salaasada waxaanu kala saarnaa dadkii u tartamay, anaga oo ku xisaabtamayna dhibcahooda, waxaana ugu yeedhnaa shanta qof ee u tartantay ee ugu sarraysa inay soo eegaan illaa iyo saddex guri.
- ▶ Maalinya Arbacada, kadib markaad guriga soo eegtay isla markaana aad xaqiijisay inaad doonayso, ayaanu u soo bandhignaa qofkii u tartamayey ee ku guulaysta.
- ▶ Maalinta Isniinta ee toddobaadka xiga, haddii aad ahayd qofkii u tartamayey ee ku guulaystay, ayaad gurigaagii cusbaa u guuri doontaa.

Haddii aad u malaynayso in guryaha aad soo eegtay midkoodna aanu ahayn wixii aad doonaysay, ama aanu anagu tartankaagii aqbalay weyno (sida caadiga ah sababta oo ah tirada dhibcaha guryaha ee guryaha la doortay oo aan ahayn qaar ku filan), markaas waa inaad u tartantaa todobaadyada ka dambeeya.

Marka aad guriga soo eegayso waxa lagu siin doonaa fursad aad ku go'aansatid haddii aad doonayso inaad sii wadid. Haddii markaad guriga soo eegaysid aad go'aansato inaanu gurigani kugu haboonayn wax dhibco ah lagaagama goynayo ama laguma ganaaxayo diiditaanka aa diiday heerkan.



Kiraynta doorashada ku salaysan

Sidee ayaan guryaha u soo helaa?

Bariga Haringey

Aagga ku xeeran Seven Sisters waxay ka faa'iidayaan barnaamijka dawladda ee £10ka milyan ah ee wax lagaga qabanayo dembiyada laguna horumarinayo guryaha iyo deegaanta maxaliga ah. Aagga Tottenham wuxuu leeyahay laymanka tareenada iyo basaska ee ugu wanaagsan.



Halkee iyo goorma ayaa guryaha la xayeysiyaa?

Waxaanu guryaha toddobaad walba ku xayeysiinaa,

- ▶ Laga bilaabo Arbacada illaa iyo Isniinta websaytkayaga ah; www.haringey.gov.uk/housing
- ▶ Labada jariidadood ee xaafadda ee lacag la'aanta ah ee la soo tuuro maalmaha Khamiista iyo Jimcaha, Tottenham iyo Wood Green Independent, iyo Muswell Hill iyo Crouch End Times.

Waxa kale oo aad nuqulka xayeysiiska toddobaadka ka eegi kartaa xaruntaada xaafadda ee adeegga macaamiisha iyo maktabad kasta oo ah kuwa xaafadda Haringey.

Waxaanu liistada guryaha ee toddobaadka kuugu soo diri karnaa email ahaan. Haddii aanad adeeggan isu diiwaangelin laakiin aad doonayso inaad isu diiwaangeliso fadlan nala soo xidhiidh (tafaasiishu waxay ku yaalliin bogga 18aad). Fadlan hubaal ka dhig inaad na siiso cinwaanka emailka ee saxa ah oo noo soo sheeg haddii aad bedesho.

Haddii aad ku nooshahay hoy kumeelgaadh ah oo ka baxsan xaafadda Haringey, ama haddii aad ku nooshahay xaafadda Haringey laakiin aanad helin jariidadahan lacag la'aanta ah, waxaanu kuu soo diri doonaa liistada dukaamada aad ka iibsan kartid toddobaad walba.

Nidaamka u tartanka

Maxaan u tartami karaa?

Waxaad u tartami kartaa guryaha ugu badan ee aad doonayso laakiinse waxa laguugu yeedhi doonaa in aan ka badnayn saddex guri toddobaadkiiba si aad u soo eegto. Sidaas darteed markaanu telifoonka kuu soo dirno si aanu kuugu sheegno guryaha lagu soo doortay inaad soo eegto waa inaad doorataa saddexdaada kama dambaysta ah.

Waanu ogsoonahay inaad doonayso inaad sida ugu dhakhsaha badan ugu heshid guri wanaagsan u naftaada iyo qoyskaaga. Guri kasta oo la xayeysiyey ayaad u tartami kartaa, laakiin waxaad guul weyn gaadhi kartaa haddii aad ku xisaabtanto sida laga yaabo in laguugu soo xulo guryaha aad u tartantay.

Tusaale ahaan:

- ▶ Tartankaaga looma soo xuli doono guryaha qolalkooda hurdadu ay ka badanyihiin inta ku habboon qoyskaaga.
- ▶ Haddii laguugu sameeyey qiimayn caafimaad oo aad u baahantahay guri ku yaalla dabaqa u hooseeya ee dhulka, laguuma soo xuli doono guri dabaq sare ku yaalla.
- ▶ Haddii laguugu sameeyey qiimayn caafimaad oo aad u baahantahay guri meesha laga gelayaa ay simantahay laguuma soo xuli doono guri gudihisa ay jaranjarooyin ku yaalliin;
- ▶ Haddii aad leedahay taariikh ah hab dhaqan aan bulshada ku haboonayn laguuma soo bandhigi doono guri ku yaalla aag ay dad badan oo da' ahi ku noolyihiin.



Kiraynta doorashada ku salaysan

Maxaan u tartami karaa?

Sida caadiga ah waxaanu guri kasta ugu yeedhnaa shanta tartame ee leh dhibcaha ugu badan iyo mudnaanta ugu sarraysa si ay guriga u soo eegaan. Dhibcahoodu waxay ka turjumi doonaan xaaladda hoyga ay hadda ku jiraan, inta qoysku le'egyahay iyo muddada ay sugayeen guri rasmi ah.

Guryaha waxa sida caadiga ah loo soo bandhigaa dadka u tar tamaya ee leh dhibcaha ugu badan. Markaas si aad fikrad uga heshid dhibcaha aad uga baahantahay noocyada kala duwan ee guryaha, xaafadaha kala duwan iyo noocyada goobaha kala duwan, waa inaad eegtaa natiijooyinkii nidaamka tar tanka ee toddobaadadii hore. Waxaad kuwan ka heli kartaa xayeysiisyada toddobaad walba iyo websaytka. Tani waxay muujin doontaa tirada dhibcaha ee qofka cusubi haystay.

Iska ogow waxaad ku heli kartid tirada dhibcaha ee aad haysatid.



Goorma iyo sidee ayaan ugu tartamaa?

Nidaamka tartanku wuxuu bilaabmaa maalin kasta oo Arbaca ah guryaha lagu xayeysiyey toddobaadkaas jariidadaha xaafadda iyo websaytka laga bilaabo Arbacada illaa iyo Isniinta. Waa inaad tartanadaada u dirtaa Home Connections inta u dhaxaysa Arbacada iyo habeen badhka Isniinta ka dambaysa.

Waxa jira saddex hab oo kala duwan oo aad tartankaaga u diri karto:

**WEBSAYTKA
TELIFOON** AHAAN
QORAAL (TEXT) AHAAN

Kuwan waxa lagu faahfaahiyey qaybta Hababka Tar tanka ee ku yaalla bogagga 15 illaa iyo 17.

Kahor inta aanad bilaabin fadlan sii diyaarso lambarkaaga aqoonsiga ee isticmaalaha (ID) iyo lambarkaaga qarsoodiga ah (PIN). Haddii aanad hubin ama mid ka mid ahi uu kaa lumay nagala soo xidhiidh Adeegga Guryaha ee Dawladda Hoose ee Haringey telifoonka ah **020 8489 1000**.



Badhtamaha Haringey

Waxa ku yaalla Xarunta Dukaansiga ee Wood Green meelo fiican oo laga dukaansado. Meelaha lagu madadaasho waxa ka mid ah laba shineemo oo shaashado badan oo ku yaalla Wood Green iyo goobaha ciyaaraha oo ay ka mid yihiin Xarunta Ciyaaraha ee New River Sports Centre ee ku taalla White Hart Lane iyo Finsbury Park.



Kiraynta doorashada ku salaysan

Goorma iyo sidee ayaan u soo eegaa guryaha?

Guri kasta waxa aanu sida caadiga ah u soo xulnaa shanta tar tame ee haysta dhibcaha ugu sarreeya ee guryaha si ay u soo eegaan.

Haddii tartanadaada loo soo xulo in ka badan saddex guri, waxaanu ku weydiisan doonaa inaad doorato saddexda guri ee aad ugu jeceshahay, waxaanaanu kuugu yeedhi doonaa inaad kuwaas soo eegtid.

- ▶ Isniinta, tartanku wuxuu xidhmaa habeen badhka.
- ▶ Salaasada, haddii aanu soo doorano tartankaaga waanu kula soo hadli doonaa si aanu kuugu soo casuuno inaad guryaha soo eegto maalinta xigta.
- ▶ Arbacada, guryaha ayaad soo eegi doontaa.
- ▶ Isniinta, shan maalmood kadib, haddii uu tartankaagii guulaystay waad u guuri doontaa.

Waxaanu raacnaa qorshe adag si aanu kaaga caawino inaad hesho guri cusub sida ugu dhakhsaha badan ee caqligalka ahna aad ugu guurto. Waa in lagu heli karaa si aad u soo eegto uguna guurtid.

Guryaha ay leeyihiin ururada guryuhu maalmaha soo eegitaanku way kala duwanyihiin sida caadiga ahna waxa lagu siin doonaa ogeysiis ka dheer oo ah taariikhda soo eegitaanka.

Badhtamaha Haringey

Inta u dhaxaysa Wood Green iyo Finsbury Park waxa ku yaalla waddada dadka badan ee Green Lanes, oo ay ku yaalliin dukaamo badan oo habeenkii furan iyo makhaayado. Waxa kale oo jira khadad gaadiid oo wanaagsan oo kugu xidhaya badhtamaha magaalada London.



Goorma ayaan heli doonaa in la ii soo bandhigo inaan noqdo qof deggan?

Kadib markaad guryaha soo eegtid waxaanu sii wadanaynaa qorshahayagii adkaa si aanu sida ugu dhakhsaha badan ee caqligalka ah kuugu rarno guriga cusub.

- ▶ Arbacada, maalintii waxaad soo eegi doontaa guryo kala duwan, kadibna waxaad go'aansan doontaa ka aad doonayso inaad u guurto.
- ▶ Jimcaha, waxa lagaa filayaa inaad saxeeexo heshiiskaaga cusub ee degganaanshaha. Haddii aad diiddo marka heerkan la maray waxa laga yaabaa in qorshahaba lagaa saaro. Aad ayay muhiim u tahay inaad samaysid doorashada saxa ah maalinta Arbacada ballantaada soo eegitaanka.

Guri kasta markaad soo eegayso waxa lagaaga baahan doonaa inaad gaadho go'aan ah 'haa' ama 'maya' inaad guriga aqbalayso haddii lagu soo bandhigo iyo in kale.

Waxa laga yaabaa inay kaa caawiyaan inaad go'aan gaadhid haddii aad soo kaxaysato qofka kula nool, saaxiibkaa, ama qof qoyskaaga ka mid ah si aydun guryaha u eegtaan.

Dhammaadka eegitaanka maalintii waxaanu guri kasta u soo bandhigi doonaa qofka u tartamaya ee ugu dhibcaha badan, ee dadka u tartamaya ee yidhi "haa" ee aqbalay. Waa caqligal inay qaar badan oo ka mid ah dadka tartamaya ay doonaan guryaha qaar ka mid ah oo gaar ah ee haysta dhibco ka badan kuwa aad haysato adigu sidaas darteed ma kari karno inaanu adiga kuu soo bandhigno midkasta oo ka mid ah guryihii aad "haa" tidhi. Waxa laga yaabaa inaad ku guulaysato markaad u tartanto toddobaadyada dambe.



Kiraynta doorashada ku salaysan

Goorma ayaan heli doonaa in la ii soo bandhigo inaan noqdo qof deggan?

Guri kasta oo aanad doonayn, waxaanu kaa doonaynaa warcelin ku saabsan waxa aad ku diiday. Warcelintaadu waxay naga caawin doontaa inaanu horumarino adeegyadayada iyo guryahayaga.

Ma aha inaad guriga aqbasho markaad eegayso. Waa inaad go'aan ka gaadhaa in guriga aad soo eegtay uu yahay kii aad u doonaysay adiga iyo qoyskaaga. Diiditaanku sinaba uma saamayn doonto sida aanu u eegi doono tar tanadaada dambe. Waxa jiri kara guri kugu habboon oo hadhowto soo baxa.



Maxaa dhacaya kahor intaan u guurin gurigayga cusub?

Waad samaysay intaadii inaad raadsato guri, adiga oo isticmaalaya nidaamka cusub ee kiraynta doorashada ku salaysan, helitaanka xayeysiisyada guryaha kirada diyaarka u ah, gelitaanka nidaamka tartanka, soo eegitaanka guryaha iyo gaadhitaanka go'aanka ah inaad doonayso inaad ku noolaato iyo in kale. Guri ayaanu kuu soo bandhignay imikana waxa jira maamul ku socda qorshe adag si ay kuugu raraan gurigaaga cusub sida ugu dhakhsaha badan ee caqligalka ah.

- ▶ Khamiista, waraysi ayaa xaffiiska lgugula yeelan doonaa si loo xaqiijiyo oo loo ansixiyo dalabkaaga guryaha.
- ▶ Jimcaha, waxa laguugu yeedhi doonaa inaad maamulka guryaha la saxeexid heshiiskaaga degganaanshaha ee cusub ee gurigaaga cusub.
- ▶ Sabtida iyo Axadda, waxaad alaabadaada u raran kartaa gurigaaga cusub.
- ▶ Isniinta, degganaanshahaaga cusub ayaa bilaabmaya waanaad u soo guuraysaa, (kaysas aad u yar ayaa laga yaabaa inay jiraan shaqooyin la dhamaystirayo oo laga yaabo inay dib u dhigaan bilowga degganaanshahaaga).

Galbeedka Haringey

Crouch End waxa lagu yaqaanaa makhaayadaheeda iyo hudheeladeeda, halka ay Muswell Hill uga dhowdahay qalcadda Alexandra Palace iyo xadiiqadda. Berkedda dabaasha ayaa ku taalla waddada Park Road, shineemo ayaa ku taalla Muswell Hill, iyo jilitaan tiyaatar iyo muusig lagu qabto xarunta beesha ee Jacksons Lane.



Kiraynta doorashada ku salaysan

Xaqiiqooyinka muhiimka ah iyo tusaaleyaal caawimo leh

- + Lagugu ganaaxi maayo haddaad diido guri markaad eegayso.
 - + Haddii aanu kombuyuutar guriga kuu oollin waxaan isticmaali kartaa kuwa lacag la'aanta ah ee yaalla sagaalka maktabadood ee Haringey.
 - + Haddii aad caawimo uga baahantahay tartamitaanka ama fahmitaanka qorshaha waanu ku caawin karnaa. Shaqaalaha xarumaha adeegga macaamiisha iyo maktabadaha ayaa iyaguna ku siin doona hagitaanka nidaamka ku saabsan.
 - + Macaamiisha dayacan waxa taageero dheeraad ah siin doona shaqaalaha guryaha iyo taageerada.
- Dawladda hoose waxay xaq u leedahay inay guryo si toos ah ugu bandhigto qoysaska ay haystaan duruufo gaar ihi iyo kuwa ku jira liistada sugitaanka ee aan lagu darin qorshaha kiraynta doorashada ku salaysan. Kuwan waxa ka mid ah qoysaska u baahan guryo wax laga bedelay.
 - Haddii aad tahay qof deggan ama qoys ay guri la'aani hayso oo ay jirto kiro kugu ururtay waxa laga yaabaa in lagaa joojiyo inaad tartantid.
 - Ururada Guryuhu waxa laga yaabaa inay xaddidaan xajmiga qoysaska ay aqbalaan qaar ka mid ah guryahooda

- ▶ Fadlan hubaal ka dhig inay tafaasiishaada xidhiidhku sax yihiin si aanu si dhakhso ah kuugula soo xidhiidhno.
- ▶ Waxaad ka eegi kartaa natiijooyinkii tartankii toddobaadyadii hore websaytka Home Connections iyo xayeysiisyada toddobaad kasta.
- ▶ Fadlan meel ammaan ah dhigo lambarkaaga aqoonsiga ee isticmaalaha iyo lambarkaaga qarsoodiga ah.

Hababka Tartanka

Kahor inta aanad bilaabin fadlan soo diyaarso lambarkaaga aqoonsiga iyo lambarkaaga qarsoodiga ah. Haddii aanad hubin ama uu mid ka mid ahi kaa lumay, ka eeg bogagga tafaasiisha xidhiidhka sida naloola xoo xidhiidho caawimona loo helo.

Uga tartamidda websaytka

Sida websaytka guryo looga helo looguna tartamo:

TALLAABADA 1AAD: geli www.haringey.gov.uk/housing sanduuqa cinwaanka ee internetka kadibna riix xidhiidhada ku geynaya "Home Connections".



TALLAABADA 2AAD: tani waxay kuu furi doontaa bogga hore ee Home Connections. Riix **I am already registered** ee ku yaalla bogga hoostiisa.

TALLAABADA 3AAD: tani waxay furi doontaa "Private Zone" waxayna ku weydiin doontaa inaad gelisid lixdaada lambar ee aqoonsiga iyo lambarkaaga qarsoodiga ah. Cadaadi **Login**.



TALLAABADA 4AAD: waxa lagu weydiin doonaa inaad doonayso inaad sii socoto maadaama aad gelayso goob la ilaalinayo. Cadaadi **Yes** si aad u sii socoto.

TALLAABADA 5AAD: bog ayaa furmi doona ku tusaya wadarta dhibcahaaga, inta qol ee hurdo ee aad u baahantahay iyo inuu dalabkaagu u diiwaangashanyahay tartan ama haddii la joojiyey. Taariikhdaadii tartanka ee dhowaan dhinaca midigta ayay ku soo qormi doontaa. Kani wuxuu muujin guryihii aad hore ugu tartantay.

TALLAABADA 6AAD: cadaadi **Search properties**. Tani waxay ku geyn doontaa bog kale. Hababka Tartanka

Kiraynta doorashada ku salaysan

Hababka Tartanka

TALLAABADA 7AAD: waxaad guryaha la hayo ka baadhi karataa adigoo sanaaduqda tafaasiisha geliya oo cadaadiya **Search for properties matching above criteria**.

TALLAABADA 8AAD: waxaa kuu soo bixi doona liistada guryaha. Cadaadi **Full property info** si aad u hesho tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan guri kasta.

TALLAABADA 9AAD: haddii aad doonayso inaad u tartanto guri aad ku aragtay jaraa'idka xaafadda ama xidhiidhka ah "TO LET – this weeks adverts"; geli lambarka xayeysiiska meesha ay ku taal "Search by property advert number" kadibna cadaadi **Find**.

TALLAABADA 10AAD: haddii gurigu kugu haboonyahay kayskaaguna firfircoonyahay waxaad heli doontaa badhanka **Click here to bid for this property** ee koonaha sare ee bidixda ku yaalla – haddii aad cadaadiso tartankaagii waa la diiwaangelinayaa waxaana heli doontaa farriin xaqiijinaysa.

Uga tartamitaanka telifoonka

Waxaad ku hadli doontaa nidaamka garashada ee isweydaarsiga codka markaad telifoonka uga tartamayso. Nidaamkani waa mid ay fududahay in la raaco tallaabo tallaabo ayuuna kuu marinayaa. Waxaad u baahan doontaa telifoonka codka bixiya ee leh badhanka calaamada hash (calaamadda # ee ku taal badhanka).

TALLAABADA 1AAD: garaac **020 7974 2696**.

TALLAABADA 2AAD: dooro luqadda aad doonayso inaad isticmaasho.

TALLAABADA 3AAD: geli lambarkaaga isticmaalaha.

TALLAABADA 4AAD: geli lambarkaaga qarsoodiga ah (PIN).

TALLAABADA 5AAD: cadaadi 1 si aad ugu tartantid guri cusub.

TALLAABADA 6AAD: geli lambarka xayeysiiska ee guriga.

TALLAABADA 7AAD: Nidaamka ayaa sharxaya guriga aad dooratay. Haddii uu yahay kii aad doonaysay cadaadi 1 markaas tartankaagii ayaa la xaqiijinayaa. Haddii aanu ahayn kaad doonaysay cadaadi 2 waxana lagu weydiin doonaa inaad mar labaad gelisid lambarka guriga.

Hababka Tartanka

Haddii aad isku daydo inaad u tartanto guri aanad xaq u lahayn tartankaagii lama sii wadi doono nidaamka ayaana kuu sheegaya tan.

Uga tartamitaanka telifoonka waxa la helaa isagoo ah af Ingiriisi iyo sagaal luqadood oo kuwa beesha ah; Sylheti, Shiine, faransiis, Soomaali, Turki, Carabi, Urdu, Punjaabi iyo Fiitnaamiis.

Telifoonka tartanka waxa la bedeli doonaa bisha January 2006, lambarka cusubi waa **0845 330 3184**. Waad ogaan doontaa markay tani dhacdo maadaama ay farriini ku duuban tahay markaad lambarkii hore garaacdo.



Ugu tartamitaanka qoraal adigoo isticmaalaya telifoonkaaga gacanta

Soo diyaarso lambarkaaga aqoonsiga iyo ka qarsoodiga ah iyo lambarka xayeysiiska.

TALLAABADA 1AAD: fur qaybta farriimaha qoraalka ah ee telifoonkaaga gacanta.

TALLAABADA 2AAD: adigoo meelo bannaan u dhaxaysiin geli: 'bid', '#', lambarkaaga isticmaalaha (ID), '#', lambarkaaga qarsoodiga ah (PIN), kadibna , guri kasta oo aad u tartamayso, '#' iyo lambarka xayeysiiska.

Tusaale ahaan, haddii lambarkaaga aqoonsiga isticmaaluhu yahay 023456, lambarkaaga qarsoodiga ahina yahay 020961 oo aad doonayso inaad u tartanto laba guri oo lambaradoodu kala yihiin 123456 iyo 555444, farriintaadu waxay noqon doontaa sidan: Bid#023456#020961#123456#555444

TALLAABADA 3AAD: Hubi inay lambaradu sax yihiin kadibna cadaadi 'send' kadibna geli oo garaac **07781 482894**.

Haddii aad tallaabada koowaad illaa iyo ta saddexaad aad si sax ah u racday, waa inaad muddo saacad gudaheed ah aad naga heshaa farriin qoraal ah oo kuu sheegaysa inuu tartankaagii sax yahay iyo in kale. Si kastaba ha ahaatee haddii helitaankaagu uu hooseeyo ma heli doontid illaa iyo aad u baxdid meel uu signalkeedu ficanyahay.

Kiraynta doorashada ku salaysan

Nala soo xidhiidhitaanka

Tafaasiisha Xidhiidhka:

Haringey Council
Housing Service
Apex House
820 Seven Sisters Road
London N15 5PQ

Telifoon:

020 8489 1000

Minicom:

020 8489 3219

Email:

lettings@haringey.gov.uk

websaytka Haringey ee Home Connections:

www.haringey.gov.uk/housing dooro
Choice based lettings waxayna tani
ku geyn doontaa xidhiidhka Home
Connections.



Xaggee ayaan kombuyuutar ka heli karaa?

Maktabadaha

Waxaad kombuyuutar lacag la'aan ah aad ka heli kartaa mid kastoo ka mid ah sagaalkayaga maktabadood:

Muswell Hill Library
Queens Avenue
Muswell Hill
London N10 3PE

Coombes Croft
Library
Tottenham High Road
London N17 8AG

Hornsey Library
Haringey Park
London N8 9JA

Wood Green Central
Library
High Road
Wood Green
London N22 6XD

Highgate Library
Shepherds Hill
Highgate
London N6 5QT

Stroud Green Library
Quernmore Road
London N4 4QR

Alexandra Park
Library
Alexandra Park Road
Wood Green
London N22 7UJ

St Ann's Library
Cissbury Road
Tottenham
London N15 5PU

Marcus Garvey Library
Tottenham Green
Centre
1 Phillip Lane
London N15 4JA

Xarumaha Adeegga Macaamiisha

Waxaad ka heli kartaa caawimo iyo talo lacag la'aan ah mid kasta oo ka mid ah afar tayada xarumood ee Adeegga Macaamiisha:

North Tottenham
639 High Road
Tottenham N17 8BD

Hornsey
Broadway Annex
Hornsey Town Hall
Crouch End N8 9JJ

South Tottenham
Apex House
820 Seven Sisters Road
South Tottenham
N15 5PQ

Wood Green
48 Station Road
Wood Green
N22 7TY

Haringey Home Connections is the new **choice based letting** scheme. For details on how it works and what you need to do, in your own language, tick the box, fill in the form and return to the address below.

Albanian

Haringey Home Connections (Lidhje Shtëpie Haringej) është skemë e re lëshimi me qira e bazuar në zgjedhje. Për hollësi në gjuhën tuaj se si funksionon dhe çfarë ju duhet të bëni, shënjeni ✓ kutinë, plotësoni dhe ktheni formularin në adresën e mëposhtme.

Arabic

إن " اتصالات هرنغبي المحلية " هي برنامج الأختيار الجديد القائم على الأجار . للحصول بلغتك الأصلية على تفاصيل حول طريقة عملها وما تحتاج عمله ضع إشارة على المربع وأملء الاستمارة وأرجعها الى العنوان أدناه.

Bengali

হ্যাঁহিৰে হোম কানেকশনস্ হুছে নতুন পছন্দচিহ্নিতক ভাড়াৰ স্কীম। এই চিহ্নিতক আপনাৰ হাৰ্টফিলিং ফ্লীম পয়েন্ট এবং বদলদলেৰ একটা সাৰাংশ আছে। এই চিহ্নিতক একটা কপি আপনাৰ নিজেৰ ভাষায় পেতে চাইলে, দয়া কৰে এই বক্সে দাগ দিব, ফৰ্মটো ভৰ্তি কৰিব আৰ নিজেৰ চিকানায় ফেরত পাঠাব।

French

Haringey Home Connections est le nouveau système de location avec choix. Pour avoir des informations dans votre langue sur comment cela marche et ce que vous devez faire, cochez la case, remplissez et renvoyez le coupon à l'adresse ci-dessous.

Kurdish

Haringey Home Connections sistema nû ya bikirêdayina xaniyan e û ew girêdayî tercihan e. Heke ku hun bi zimanê xwe, di darbarî ka ew çawa dixebite û ka divê hun çî bikin de agahî dixwazin, qutiyê îşaretê bikin, vê formê tijî bikin û vegeirînin edresa li jêr.

Portuguese

Haringey Home Connections é o novo plano de locação baseado em escolha. Para detalhes sobre como ele funciona e o que você precisa fazer, em sua própria língua, marque o quadradinho, preencha o formulário e retorne-o para o endereço abaixo.

Romanian

Haringey Home Connections este schema de închiriat bazată pe noul tip de alegere. Dacă doriți o copie a acestei scrisori, conținând punctajul dvs, de cazare și sumariul schimbărilor în limba dvs, bifati caseta, completați formularul și trimiteți-l la adresa de mai jos fără timbru poștal.

Somali

Haringey Home Connections waa nadaamka cusub ee guri dad lagu siin doono. Nuqul ka mid ah qoraalka ka kooban helitaanka iyo soo koobid sida barnaamijku u shaqeeyo. Hadaad rabto in luuqadiina lagu tarjumo, sax mari sanduukha, soo buuxi, kuna soo dir ciwaanka hoose.

Turkish

Haringey Home Connections seçenek taniyan yeni kira programıdır. Bu programın çalışma detayları ve ne yapmanız gerektiğine ilişkin kendi dilinizde bilgi için kareyi işaretleyip formu doldurarak aşağıdaki adrese gönderiniz.

Please tell us if you would like a copy of this leaflet in another language that is not listed above or in any of the following formats, and send the form to the Freepost address below.

In large print On disk On audio tape

In Braille In another language, please state:

Name:

Address:

Tel:

Please return to: Freepost RLXS-XZGT-UGRJ, Haringey Council, Translation and Interpretation Services, 8th Floor, River Park House, 225 High Road, London N22 8HQ